



# Qaab cusub oo ku sabsan sida loo dalbado gaadiidka dugsiga

Gu'gan dhexdiisa waxaa jiri doona nidaam cusub oo codsi ah oo loogu talagalay gaadiidka dugsiga ama kaararka baska ee ardayda dhigata dugsiga khasabka ah. Waalidka ama qofka ka ah masuulka ilmaha waxa ay ka codsanayaan adeegga elektaroonigga ah ee degmada boggeeda internetka waxa ayna ku soo galayaan aqoonsiga elektarooniga ah. Haddii aadan haysan aqoonsi elektaroonig ah, waxa aad ka helaysaa adiga bangigaaga.

Tani waxa ay sidoo kale ku khusaysaa adigaa qudhaada ee leh carruur horeyba u haysatay kaarka gaadiidka dugsiga ama kaasrka baska dugsiga. Nidaamka cusub ee dalabka ma khuseeyo dugsiyada gaarka ah ama dugsiyada sare.

Dhamaan degmooyinka gobolka Dalarna waxa ay si wada jir ah ula shaqeeyayneen in muddo ah Dalatrafik sidii loo hagaajin lahaa maaraynta kaarka basaska iyo gaadiidka dugsiga. Ujeedada isbedelkani waxaa ka mid ah in, socodka basaska si fiican loo qorsheeyey iyo sidaas darteed saamaynta deegaanka oo yaraata iyo sidaas oo kale kharashka oo la yareeyo.

ogaalada ku saabsan sida loo codsado waxa ay kuu imanayaan waqtii fiican ka hor inta aan codsiga la samayn. Haddii aad hadda su'aalo qabtid hadda, la xiriir maamulaha baska dugsiga dhanka emayl

[skolskjuts@malung-salen.se](mailto:skolskjuts@malung-salen.se)

Isku xidhka:

<https://malung-salen.se/skolskjuts>